



# Ogaysiis Cusub oo loogu talagaley Itoobiya

**Abril 12, 2024,  
Dowladda Mareykanka ayaa ku  
dhawaaqday Dib-u-qaabaynta Xaaladda  
Ilaalinta Ku-meel-gaadhka ah (TPS) ee  
muwaadiniinta Itoobiyaanka ah.**



Taas macnaheedu waxa weeye in dad ka yimid Itoobiya oo ku noolaa Mareykanka **laga bilaabo Abril 11, 2024** waxay awood u yeelan doonaan inay codsadaan (Temporary Protected Status, TPS), iyo ogolaanshaha shaqada.



Waxaad awood u yeelan doontaa inaad codsato TPS iyo ogolaanshaha shaqada, laga bilaabo **Abril 15, 2024**.

Kuwa **hore u haystay TPS** waxay awood u yeelan doonaan inay dib u cusboonaysiiyaan TPS-kooda mudo 18 bilood oo dheeraad ah **waana inay dib ucodsigooda soo gudbiyaan inta u dhaxaysa Abril 15, 2024 iyo Juun 15, 2024** si aysan ulumin maqaamkooda/ ogaalanshahooda.



## Ka digtoonow khiyaanooyinka socdaalka sharciga iyo dadka khiyaanadaas ku shaqaysta

### Xasuusnow:

- Keliya qareen shati haysta ama wakiil ay (Department of Justice, DOJ) aqoonsantahay ayaa codsiyada buuxin karaya.
- Shakhsi nootaayiste ah balse aan ahayn qareen shatiyeysan awood uma lahan inuu kuu buuxiyo foomamkan/ama asagoo kumatalay kuu fayl-gareeyo. Sidoo kale inay shaqadan kuu qabtaan kharash kaamaga qaadan karaan.



Sharciga socdaalku waa adagyahay. Ka digtoonow khayaanada sharciga socdaalka ama shakhsiyaadka khiyaamadan ku shaqaysta kuwaas oo laga yaabo inay sidoo kale kaa qaadaan ballanqaadyo been ah, sida:

- Sida ogolaanshaha shaqada ama fiisaha loogu helo **si dhakhso ah**.
- Bayaano sheegaya inaysan **jirin khatar ama cawaaqib dhici karta**.
- Sheegashada **saamayn gaar ah** oo ay ku leeyihiin hay'adaha socdaalka.



Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan khiyaanada sharciga socdaalka, uriix dhinaca bidix ama booqo:



<https://www.nyc.gov/site/immigrants/legal-resources/avoid-fraud.page>



## 1-800-354-0365

Waxaad caawimo xagga sharciga ah ka heli kartaa xafiiska (Mayor's Office for Immigrant Advancement, MOIA) adiga oo ka wacaya khadka taageerada sharciga socdaalka **Isniin ilaa Jimco, 9 subacnimo ilaa 6 maqribnimo**